



SHIR-SANNADEEDKA GARSOORKA SOOMAALIYA


المؤتمر السنوي للسلطة القضائية

ANNUAL JUDICIARY CONFERENCE

ANNUAL BOOK 2026

Halkudhigga Shirka

“GARSOOR AWOOD LEH BULSHO AAMIN AH.”





TUSMADA BUUGA

KALMADDA GUDOOMIYAHAMAXKAMADDA SARE	2
HORDHAC	3
QAYBTA 1 ^{aad} : JAANTUSKA DACWADAHA MAXKAMADAHA 2025	4
DACWADAHA MAXKAMADDA SARE EE JFS	4
DACWADAHA MAXKAMADAHA GOBOLKA BANAADIR	4
MAXKAMADDA RAFCAANKA GOBOLKA BANAADIR	5
MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR	5
SHAXDA DACWADAHA IYO MUCAAMALAADKA MAXKAMADAHA DEGMOOYINKA GOBOLKA BANAADIR	6
Maxkamadda Degmada Dayniile	6
Maxkamadda Degmada Hodan	7
Maxkamadda Degmada Yaaqshiid	8
Shaxda Maxkamadda Degmada Yaaqshiid	8
Maxkamadda Degmada Kaaraan	8
Maxkamadda Degmada Waaberi	9
Maxkamadda Degmada Wadajir	9
Maxkamadda Degmada Howl-wadaag	10
Maxkamadda Degmada Xamar-weyne	10
Maxkamadda Degmada Wardhiigley	11
Maxkamadda Degmada Kaxda	11
Maxkamadda Degmada Shibis	12
Maxkamadda Degmada Cabdicasiis	12
QEYBTA 2 ^{aad} AAD: DACWADAHA XAFIISKA XEER-ILAALIYAHA 2025	13
QAYBTA 3 ^{aad} : DACWADAHA MAXKAMADDA CIIDAMADA QALABKA SIDA 2025.	14
.....	15
QEYBTA 4 ^{aad} : HORUMARRADA HAY'ADAHA GARSOORKA 2025	16
4.0. Himilooyinka Istiraatiijiga ah ee Garsoorka	16
4.1. Dulmar Guud: Waxqabadka Garsoorka 2025	18
4.1.1. Dhagax-dhigidda Dhismo Cusub oo uu yeelanayo Garsoorka Dalka	19
4.1.2. Hawlgelinta Garsoorayaal, Kaaliyayaal iyo Xeer-ilaaliyayaal Cusub	21
4.1.3. Ku Xiridda Nidaamka Aqoonsiga Qaranka (NIRA) ee Hay'adaha Garsoorka	22
4.1.4. Isku Xiridda Nidaamka Dakhliga Wasaaradda Maaliyadda iyo Garsoorka	23



4.1.5. Dardargelinta iyo Dadajinta Dacwadaha Maxkamadaha	24
4.1.6. Horumarinta Nidaamka Mideysan ee Maareynta Dacwadaha	25
4.1.7. Tababarka iyo Kor U Qaadista Kartida Hawl-wadeennada Garsoorka	26
4.1.8. Machadka Tababarka Garsoorka.....	27
4.1.9. Madasha Garsoorayaasha Dalka.....	27
4.1.10. Barnaamijyada Internship-ka iyo Aqoon-kororsiga Ardayda Barata Sharciga.....	28
4.2. Caqabadaha La Wajahay.....	29
Qaybta 5 ^{aad} WAXQABADKA XAFIISKA XEER-ILAALIYAHA GUUD QARANKA 2025 ...	31
1.0. Howlgalinta Xeer Ilaaliyaasha Cusub ee Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka	31
1.1. Howlgalinta Kaaliyaasha Cusub ee Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka:	31
1.2. Kulanka Xeer Ilaaliyaha Guud iyo Safiirka Maraykanka.....	32
1.3. Wadashaqaybta Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud iyo Hay'adda GIST:	32
1.4. Baarista iyo Oogista Dacwadda Tahriibka ee Mayoota:.....	32
1.5. Ladagaalanka Maalgalinta Argagaxisada:	33
1.6. Ladagaalka Dambiga Canshuur Labaxsiga:	33
1.7. Ladagaalanka Daroogada:	33
1.8. La-dagaalanka Cuntada Dhacday:.....	34
1.9. Soo-celinta Eedayanayaasha u baxsada dalka dibadiisa:	35
1.10. Kormeerka Isbitaal Madiina:.....	35
1.11. Qaybta Kormeerka Xabsiyada iyo Maxaabiista:.....	35
1.12. Kulanka Waaxda la dagaalanka denbiyada Lidka ku ah Ka Ganacsiga Dadka iyo Socdaalka Sharci darrada ah iyo Hoggaanka CID:	36
1.13. Kormeerka Laanta Dhexe Ilaalaada Canshuuraha:.....	36
1.14. Cafiska Maxaabiista:.....	36
1.15. Tayeynta Xirfada Hawlwadeenada Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud	37
1.16. Kulanka Wadajirka ah ee Waaxda Dembiyada Lidka ku ah Dawladda iyo Nidaamka Guud & Waaxda Dilalka iyo Dhaawacyada ee Q.B.D. (CID).....	37
1.17. Kulanka Madasha Qaran ee Forensiga (kulanka 4aad):.....	37
1.18. Talo Soo Jeedin	38
1.19. GABAGABO	38
1.20. GUNAANAD.....	39



Baashe Yuusuf Axmed

Guddoomiyaha Maxkamadda Sare JFS

Waxaa farxad inoo ah inaan halkaan ku soo bandhigno Warbixin Sanadeedka Garsoorka Dalka ee 2025, kaas si guud sawir uga bixinaya waxqabadyada, horumarada iyoguulaha ee ay xaqiijiyeen hay'adaha Garsoorka Dalka intii lagu guda jiray sannadka 2025.



Buug Sannadeedka Garsoorka 2025 waxa uu ka tarjumayaadadaalka joogtada ah iyo naf-hurnimada ay muujiyeen maamulka iyo hawl-wadeennada kala duwan ee Garsoorka Dalka, heer Federaal iyo heer Dowladaha Xubnaha ka ah Dowladda Federaalka iyo sidoo kale Maxkamadaha Caadiga ah iyo Maxkamada Ciidamada, si loo xaqiijiyo Garsoor hufan, madax-bannaan, isla-markaana awood u leh ka jawaabista baahiyaha garsoor ee dadka ku nool gayiga Soomaaliya.

Sadarada buuggan waxaan marqaati uga noqon doonaa miraha shaqadii wadajirka ahayd ee ay qabteen hay'adaha Garsoorka, marxaladihii la soo maray, iyo guud ahaan caqabadihii lala kulmay sannadkii la soo dhaafay. Sidoo kale Buug Sanadeedkan waxa uu soo bandhigi doonaa warbixin dhammaystiran oo ku saabsan dib-u-habeynta maamulka, kor u qaadista hufnaanta maaliyadeed, dayactirka iyo horumarinta kaabayaasha garsoorka, isticmaalka tiknoolajiyadda casriga ah, tababarka iyo mudnaan-siinta hawl-wadeennada, maamulka dacwadaha, iyo sidoo kale kor u qaadista kalsooni-da iyo wacyiga bulshada ee nidaamka garsoorka.

Inkasta oo ay jireen caqabado, haddana Garsoorka Dalka waxa uu muujiyey adkaysi, midnimo iyo ka go'naanshiyo ku aaddan gudashada waajibaadkiisa dastuuriga ah, gaar ahaan ilaalinta xuquuqda muwaadiniinta, dhowrista sharciga, iyo xaqiijinta caddaalad loo siman yahay.

Waxaan u mahadcelinayaa dhammaan cid walba oo talo, taageero iyo tusaaleyn ka geysatay habsami u socodka hawlaha Garsoorka, masuuliyiinta sare ee Maxkamadaha heerarkooda kala duwan, Xafiiska Xeer-ilaaliyaha Guud ee heer Federaal iyo Xafisyada heer Dowladaha Xubnaha ka ah Dowladda Federaalka, Garsoorka Ciidamada darajooyinkooda kala duwan, Machadka Tababarka Garsoorka, iyo dhammaan hawl-wadeenada kala duwan, oo isugu jira Garsoorayaal, Kaaliyayaal, Gaarsiiyayaal, iyo farsamayaqaanno, oo bixiyay dadaal iyo shaqo hufan.

Ugu dambayn, waxaan rajeynayaa in Buugga Sannadeedka Garsoorka 2025 uu noqdo tixraac waxtar leh, miisaan aqooneed oo lagu qiimeeyo waxqabadyada la gaaray, isla markaana lagu dejiyo jihada mustaqbalka ee horumarinta nidaamka caddaaladda dalka.

Mahadsanidiin



HORDHAC

Soo bandhigidda Buugga Sannadka Garsoorka wuxuu ka turjumayaa dhammaan adeegyada caddaaladeed ee uu u qabtay bulshada, harumarka uu gaaray iyo caqabadaha shaqo ee soo wajahay Garsoorka dalka sanadkaas uu buuggu ku taariikheysan yahay. Ujeedka bandhigga waa in umadda Soomaliyeed iyo ciddii kale ee danaynaysa ay hal goob ka heli karaan xog dhammaystiran oo ku saabsan shaqada garsoorka ee sanadkii tagey.

Soo saaridda buugan waxa ay ku aaddan tahay goor ahaan xilliga uu qabsoomayo shir-sanadeedka Garsoorka, kaas oo la qabto bilowga sanad kasta, iyadoo sannadkani uu noqonayo kii Sideedaad ee uu si habsami leh u qabsoomayo shir-sanadeedkan tan iyo markii dib loo billaabay qabsoomiddiisa sanadkii 2019, kaddib burburkii dowladnimada dalka. Sidaas si la mid ah, buuggan waa sanadkii sideedaad ee la soo bandhigayo, iyada oo horay loo soo bandhigay sanadihii tagey ee ku kala taariikheysan 2018, 2019, 2020, 2021, 2022, 2023 iyo 2024.

Guud ahaan dacwadaha Garsoorka sanadka 2025 oo ka turjumaya adeegyada caddaaladeed ee Garsoorka qeybihiisa kala duwan uu u qabtay bulshada asaga oo gudanaya waajibaadkiisa ku xusan dastuurka iyo shuruucda kale ee dalka. Iyada oo hay'ad walba gudanayso waajibaadkeeda goonida ah, dacwadaha guud ee sanadka 2025 kafurnaay hay'adaha Garsoorka waxa ay gaarayaan wadar guud oo ah **15,730** dacwo. Dacwooyinkaas, **7,433** waxaa qabtay maxkamadaha, halka **4,293** dacwo uu qabtay Xaafiiska Xeer-ilaaliyaha Guud. Sidoo kale **4,004** dacwo waxaa qabtay Maxkamadda Ciidamada Qalabka sida.

Waxaa xusid mudan in Dowlad-gobaleedyada dhamaantood aysan qeyb ka aheyn Warbixin-sanadeedka Garsoorka Dalka ee 2025 taas oo ku timid arrimo farsamo iyo siyaasadeed awgood.




QAYBTA 1aad: JAANTUSKA DACWADAHA MAXKAMADAHA 2025 DACWADAHA MAXKAMADDA SARE EE JFS

Maxkamadda Sare ee JFS oo ah Maxkamadda ugu sarreysa dalka, waxaa xarun u ah caasimadda dalka ee Muqdisho, guud ahaan dacwadaha ay qabatay ee isugu jira dacwado ka soo gudbay sanadihii hore iyo kuwa la furay sanadka 2025 waa **255**, waxaa dhammaaday **126** oo isugu jira galal ka soo wareegay sanadkii hore iyo sanadkan, waxaa wali socda **128**.

Shaxda Dacwadaha Maxkamadda Sare Ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya

Nooca Dacwadda	Galal hore	Galal la furay	Socdo	Go'aan	Xukun
Dacwadaha Qoyska	11	18	12	6	11
Dacwadaha Madaniga	48	76	58	41	25
Dacwadaha Shaqaalaha	0	4	4	0	0
Dacwadaha Maamulka	9	3	9		3
Dacwadaha Fulinta	6	20	7	19	0
Dacwadaha Dib u Eegista	15	21	25	9	2
Dacwadaha Ciqaabta	14	10	13	4	6
Wadarta Guud	103	152	128	79	47

Jaantuska Dacwadaha Maxkamadda Sare Ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya



DACWADAHA MAXKAMADAHA GOBOLKA BANAADIR

Maxkamadaha Gobolka Banaadir waxa ay ka kooban yihiin labo darajo oo kala ah: Maxkamadaha Derajada 1aad oo isugu jira Gobol iyo degmo, iyo Maxkamadda Derajada 2aad oo ah Maxkamadda Rafcaanka Gobolka Banaadir.

Guud ahaan, dacwadaha ay qabteen Maxkamadaha Gobolka Banaadir darajooyinkooda kala duwan sanadka 2025 waa **7,178**. Dacwadahaas waxaa dhammaaday **4,206** oo isugu jira galal ka soo wareegay sanadkii hore iyo sanadkaan, waxaa wali socda **2,972**. Sidoo kale, Maxkamadaha Gobolka Banaadir waxa ay qabteen guud ahaan adeeg mucaamalaad oo dhan **23,650**.



MAXKAMADDA RAFCAANKA GOBOLKA BANAADIR

Maxkamadda Rafcaanka Gobolka Banaadir guud ahaan dacwadaha ay qabatay ee isugu jira dacwado ka soo gudbay sanadihii hore iyo kuwa la furay sanadka 2025 waa **586**, waxaa dhammaaday **302 dacwo** oo isugu jira galal ka soo wareegay sanadkii hore iyo sanadkan, waxaana wali socda **284 dacwo**. Sidoo kale, waxa ay qabatay adeeg mucaamalaad oo dhan **2,772**.

Shaxda Dacwadaha Maxkamadda Racfaanka Gobolka Banaadir

Nooca Dacwadda	Galal hore	Galal la furay	Socdo	Go'aan	Xukun
Dacwadaha Qoyska	31	51	33	23	26
Dacwadaha Madaniga	141	146	173	43	71
Dacwadaha Fulinta	12	25	10	27	0
Dacwadaha Cigaabta	56	124	68	59	53
Wadarta Guud	240	346	284	152	150

Jaantuska Dacwadaha Maxkamadda Racfaanka Gobolka Banaadir



Shaxda Warbixinta Mucaamilaadka

SHAXDA WARBIXINTA MUCAAMILAADKA		
No.	Nuuca Mucaamalaadka	Tirada
1.	Tasdiiga Wakaaladaha	2,772
	Wadarta guud	2,772.

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

Maxkamadda Gobolka Banaadir waxa ay guud ahaan qabatay dacwado isugu jira kuwo ka soo wareegay sanadihii hore iyo kuwo sanadkan la furtay, waana **4248** dacwo, oo ay dhammaadeen **2,226** dacwo oo isugu jira galal ka soo wareegay sanadkii hore iyo sanadkan, waxaana wali socda **2022** dacwo.



Shaxda Dacwadaha Maxkamadda Gobolka Banaadir

Maxkamadda Gobolka	Galal hore	Galal la furay	Socdo	Go'aan	Xukun
Dacwadaha Madaniga	987	551	1185	179	174
Dacwadaha Shaqaalaha	2	11	7	3	3
Dacwadaha Gaaban	26	22	23	20	5
Dacwadaha Fulinta	122	158	188	92	0
Dacwadaha Ciqaabta	500	1869	619	1072	678
Wadarta Guud	1637	2611	2022	1366	860

Jaantuska Dacwadaha Maxkamadda Gobolka Banaadir



SHAXDA DACWADAHA IYO MUCAAMALAADKA MAXKAMADAHA DEGMOOYINKA GOBOLKA BANAADIR

Maxkamadda Degmada Dayniile

Maxkamadda Degmada Deyniile waxa ay guud ahaan qabatay dacwado isugu jira kuwo ka soo gudbay sanadihii hore iyo kuwo sanadkaan 2025 ah, waana **122** dacwo, waxayna sidoo kale qabatay adeeg mucaamalaad oo dhan **1050**, sida ku cad jaantusyada hoose.

Shaxda Maxkamadda Degmada Dayniile

MAXKAMADDA DEGMADA DAYNIILE					
Nooca Dacwadda	Galal Hore	Galal la Furay	Socda	Go'aan	Xukun
Dacwadaha Qoyska	17	68	37	36	12
Dacwadaha Madaniga	1	32	5	27	1
Dacwadaha Fulinta	0	2	1	1	0
Dacwadaha Ciqaabta	0	2	0	0	2
Wadarta Guud	18	104	43	64	15



Maxkamadda Degmada Dharkeynley

Maxkamadda Degmada Dharkeynley waxa ay guud ahaan qabatay dacwado isugu jira kuwo ka soo gudbay sanadihii hore iyo kuwo sanadkaan 2025 ah, waana **233** dacwo, waxayna sidoo kale qabatay adeeg mucaamalaad oo dhan **2,501**, sida ku cad jaantusyada hoose.

Shaxda Maxkamadda Degmada Dharkeenley

MAXKAMADDA DEGMADA DHARKEYNLEY					
Nooca Dacwadda	Galal Hore	Galal la Furay	Socda	Go'aan	Xukun
Dacwadaha Qoyska	16	120	48	71	17
Dacwadaha Madaniga	3	74	12	57	8
Dacwadaha Fulinta	0	5	2	3	0
Dacwadaha Ciqaabta	1	14	2	11	1
Wadarta Guud	20	213	64	142	26

Maxkamadda Degmada Hodan

Maxkamadda Degmada Hodan waxa ay guud ahaan qabatay dacwado isugu jira kuwo ka soo gudbay sanadihii hore iyo kuwo sanadkaan 2025 ah, waana **309** dacwo, waxayna sidoo kale qabatay adeeg mucaamalaad oo dhan **2,430**, sida ku cad jaantusyada hoose.

Shaxda Maxkamadda Degmada Hodan

MAXKAMADDA DEGMADA HODAN					
Nooca Dacwadda	Galal Hore	Galal la Furay	Socda	Go'aan	Xukun
Dacwadaha Qoyska	74	91	43	16	106
Dacwadaha Madaniga	23	94	31	4	82
Dacwadaha Fulinta	2	6	7	0	1
Dacwadaha Ciqaabta	3	16	0	16	3
Wadarta Guud	102	207	81	36	192



Maxkamadda Degmada Yaaqshiid

Maxkamadda degmada Yaaqshiid waxa ay guud ahaan qabatay dacwado isugu jira kuwo ka soo gudbay sanadihii hore iyo kuwo sanadkaan 2025 ah, waana **313** dacwo, waxayna sidoo kale qabatay adeeg mucaamalaad oo dhan **3,908**, sida ku cad jaantusyada hoose.

Shaxda Maxkamadda Degmada Yaaqshiid

MAXKAMADDA DEGMADA YAAQSHIID					
Nooca Dacwadda	Galal Hore	Galal la Furay	Socda	Go'aan	Xukun
Dacwadaha Qoyska	175	64	32	191	16
Dacwadaha Madaniga	28	6	2	31	1
Dacwadaha Fulinta	2	11	7	6	0
Dacwadaha Ciqaabta	6	21	1	22	4
Wadarta Guud	211	102	42	250	21

Maxkamadda Degmada Kaaraan

Maxkamadda degmada Kaaraan waxa ay guud ahaan qabatay dacwado isugu jira kuwo ka soo gudbay sanadihii hore iyo kuwo sanadkaan 2025 ah, waana **241** dacwo, waxayna sidoo kale qabatay adeeg mucaamalaad oo dhan **1,314**, sida ku cad jaantusyada hoose.

Shaxda Maxkamadda Degmada Kaaraan

MAXKAMADDA DEGMADA KAARAAN					
Nooca Dacwadda	Galal Hore	Galal la Furay	Socda	Go'aan	Xukun
Dacwadaha Qoyska	36	114	43	91	16
Dacwadaha Madaniga	7	29	6	24	6
Dacwadaha Fulinta	0	4	4	0	0
Dacwadaha Ciqaabta	0	51	2	45	4
Wadarta Guud	43	198	55	160	26



Maxkamadda Degmada Waaberi

Maxkamadda Degmada Waaberi waxa ay guud ahaan qabatay dacwado isugu jira kuwo ka soo gudbay sanadihii hore iyo kuwo sanadkaan 2025 ah, waana **250** dacwo, waxayna sidoo kale qabatay adeeg mucaamalaad oo dhan **2,559**, sida ku cad jaantusyada hoose.

Shaxda Maxkamadda Degmada Waaberi

MAXKAMADDA DEGMADA WAABERI					
Nooca Dacwadda	Galal Hore	Galal la Furay	Socda	Go'aan	Xukun
Dacwadaha Qoyska	34	94	54	7	67
Dacwadaha Madaniga	20	63	32	3	48
Dacwadaha Fulinta	16	13	13	1	15
Dacwadaha Ciqaabta	2	8	5	3	2
Wadarta Guud	72	178	140	14	132

Maxkamadda Degmada Wadajir

Maxkamadda Degmada Wadajir waxa ay guud ahaan qabatay dacwado isugu jira kuwo ka soo gudbay sanadihii hore iyo kuwo sanadkaan 2025 ah, waana **159** dacwo, waxayna sidoo kale qabatay adeeg mucaamalaad oo dhan **1,322**, sida ku cad jaantusyada hoose.

Shaxda Maxkamadda Degmada Wadajir

MAXKAMADDA DEGMADA WADAJIR					
Nooca Dacwadda	Galal Hore	Galal la Furay	Socda	Go'aan	Xukun
Dacwadaha Qoyska	48	63	20	78	13
Dacwadaha Madaniga	5	27	3	21	8
Dacwadaha Fulinta	0	8	4	4	0
Dacwadaha Ciqaabta	0	8	1	5	2
Wadarta Guud	53	106	28	108	23



Maxkamadda Degmada Howl-wadaag

Maxkamadda Degmada Howl-wadaag waxa ay guud ahaan qabatay dacwado isugu jira kuwo ka soo gudbay sanadihii hore iyo kuwo sanadkaan 2025 ah, waana **97** dacwo, waxayna sidoo kale qabatay adeeg mucaamalaad oo dhan **1,004**, sida ku cad jaantusyada hoose.

Shaxda Maxkamadda Degmada Howl-wadaag

MAXKAMADDA DEGMADA HOWL-WADAAG					
Nooca Dacwadda	Galal Hore	Galal la Furay	Socda	Go'aan	Xukun
Dacwadaha Qoyska	6	52	34	21	3
Dacwadaha Madaniga	22	7	8	17	4
Dacwadaha Fulinta	5	3	6	2	0
Dacwadaha Ciqaabta	0	2	0	2	0
Wadarta Guud	33	64	48	42	7

Maxkamadda Degmada Xamar-weyne

Maxkamadda Degmada Xamar-weyne waxa ay guud ahaan qabatay dacwado isugu jira kuwo ka soo gudbay sanadihii hore iyo kuwo sanadkaan 2025 ah, waana **79** dacwo, waxayna sidoo kale qabatay adeeg mucaamalaad oo dhan **1,787**, sida ku cad jaantusyada hoose.

Shaxda Maxkamadda Degmada Xamar-weyne

MAXKAMADDA DEGMADA XAMAR-WEYNE					
Nooca Dacwadda	Galal Hore	Galal la Furay	Socda	Go'aan	Xukun
Dacwadaha Qoyska	3	33	10	20	6
Dacwadaha Madaniga	0	23	12	9	2
Dacwadaha Fulinta	11	8	12	7	0
Dacwadaha Ciqaabta	0	1	0	0	1
Wadarta Guud	14	65	34	36	9



Maxkamadda Degmada Wardhiigley

Maxkamadda Degmada Wardhiigley waxa ay guud ahaan qabatay dacwado isugu jira kuwo ka soo gudbay sanadihii hore iyo kuwo sanadkaan 2025 ah, waana **52** dacwo, waxayna sidoo kale qabatay adeeg mucaamalaad oo dhan **744**, sida ku cad jaantusyada hoose.

Shaxda Maxkamadda Degmada Wardhiigley

MAXKAMADDA DEGMADA WARDHIIGLAY					
Nooca Dacwadda	Galal Hore	Galal la Furay	Socda	Go'aan	Xukun
Dacwadaha Qoyska	14	29	18	23	2
Dacwadaha Madaniga	1	5	0	6	0
Dacwadaha Fulinta	0	2	2	0	0
Dacwadaha Ciqaabta	0	1	0	0	1
Wadarta Guud	15	37	20	29	3

Maxkamadda Degmada Kaxda

Maxkamadda Degmada Kaxda waxa ay guud ahaan qabatay dacwado isugu jira kuwo ka soo gudbay sanadihii hore iyo kuwo sanadkaan 2025 ah, waana **105** dacwo, waxayna sidoo kale qabatay adeeg mucaamalaad oo dhan **732**, sida ku cad jaantusyada hoose.

Shaxda Maxkamadda Degmada Kaxda

MAXKAMADDA DEGMADA KAXDA					
Nooca Dacwadda	Galal Hore	Galal la Furay	Socda	Go'aan	Xukun
Dacwadaha Qoyska	8	34	5	18	19
Dacwadaha Madaniga	6	26	8	13	11
Dacwadaha Fulinta	2	16	5	13	0
Dacwadaha Ciqaabta	0	13	1	11	1
Wadarta Guud	16	89	19	55	31



Maxkamadda Degmada Shibis

Maxkamadda Degmada Shibis waxa ay guud ahaan qabatay dacwado isugu jira kuwo ka soo gudbay sanadihii hore iyo kuwo sanadkaan 2025 ah, waana **323** dacwo, waxayna sidoo kale qabatay adeeg mucaamalaad oo dhan **815**, sida ku cad jaantusyada hoose.

Shaxda Maxkamadda Degmada Shibis

MAXKAMADDA DEGMADA SHIBIS						
Nooca Dacwadda	Galal Hore	Galal Furay	Ia	Socda	Go'aan	Xukun
Dacwadaha Qoyska	99	104		80	115	8
Dacwadaha Madaniga	34	56		35	52	3
Dacwadaha Fulinta	16	9		4	21	0
Dacwadaha Ciqaabta	0	5		1	4	1
Wadarta Guud	149	174		120	192	12

Maxkamadda Degmada Cabdicasiiis

Maxkamadda Degmada C/casiis waxa ay guud ahaan qabatay dacwado isugu jira kuwo ka soo gudbay sanadihii hore iyo kuwo sanadkaan 2025 ah, waana **61** dacwo, waxayna sidoo kale qabatay adeeg mucaamalaad oo dhan **712**, sida ku cad jaantusyada hoose.

Shaxda Maxkamadda Degmada Cabdicasiiis

MAXKAMADDA DEGMADA CABDICASIIS						
Nooca Dacwadda	Galal Hore	Galal Ia Furay	Socda	Go'aan	Xukun	
Dacwadaha Qoyska	7	40		6	32	9
Dacwadaha Madaniga	2	12		2	11	1
Dacwadaha Fulinta	0	0		0	0	0
Dacwadaha Ciqaabta	0	0		0	0	0
Wadarta Guud	9	52		8	43	10



QEYBTA 2^{aad} AAD: DACWADAHA XAFIISKA XEER-ILAALIYAHA 2025

Guud ahaan, Xafiiska **Xeer-Ilaaliyaha Guud ee Qaranka** waxa uu qabtay dacwado isugu jira kuwa ka soo gudbay sanadihii hore iyo kuwo sanadka 2025, wadartooduna waxa ay tahay **4,293**, waxaa dhammaaday **2,012** oo isugu jira galal ka soo wareegay sanadkii hore iyo sanadkan, waxaa wali socda **1,388**.

Shaxda Dacwadaha Xafiiska Xeer-Ilaalinta 2025

Nooca Dembiga	Eedeysanaha/yaasha			Dhibbane/yaal			Galal hore	Galal furay	So cdo	Go' aan	Xukun	
	Tirada	Lab	Dhedig	Tirada	Lab	Dhedig					Beri	Dembile
D. Hantida	1980	1682	298	1893	1408	397	201	1210	416	765	118	150
D. Nafta	2296	1874	422	1988	1462	417	557	1216	496	912	147	223
D. Maaliyada	183	149	34	115	89	26	405	94	233	203	22	21
D. Jinsiga	443	360	83	413	122	417	71	212	114	58	36	75
D. Maandooriyaha	98	79	19	57	41	16	46	31	18	18	11	30
D. Socdaalka	213	164	49	120	87	66	24	108	61	23	7	18
D. Bada	19	19	0	0	0	0	4	5	4	0	0	5
D. oogis Madini ah	115	76	39	89	77	50	17	53	32	21	3	14
D deegaanka	28	28	0	0	0	0	4	18	9	6	1	6
D. Internet ka	55	40	15	0	0	0	5	12	5	6	2	4
Wadarta guud	5,430	4,471	959	4,675	3,286	1,389	1,334	2,959	1,388	2,012	347	546



QAYBTA 3aad: DACWADAHA MAXKAMADDA CIIDAMADA QALABKA SIDA 2025.


Maxkamada ciidamada Qalabka Sida waxa ay ka kooban tahay labo darajo oo kala ah: Maxkamadaha Derajada 1aad ee Ciidamada Qalabka Sida, iyo Maxkamadda Derajada 2aad ee Ciidamada Qalabka Sida.

Guud ahaan, dacwadaha ay qabteen Maxkamadaha Ciidamada Qalabka sida labadeeda darajo sanadka 2025 waa **4004 dacwo**. Dacwadahaas waxaa dhammaaday **3,364** oo isugu jira galal ka soo wareegay sanadkii hore iyo sanadkaan, waxaa wali socda **460**.

Jaantusyadda Dacwadaha Maxkamadda Ciidamada Qalabka Sida 2025.



NUUCYADDA DEMBIYADA




Falanqaynta Dembiyadda



Falanqaynta 2024 iyo 2025




JAANTUSKA HAY'ADDAHA BAARISTA SOO GUDBISAY




Falanqaynta Hay'ddaha

WARBIXINTA EDEEYSANAYAASHA KATIRSAN
Tirada & Boqolley (%)



Falanqaynta Qaybaha

WADAMADA EDEEYSANAYAASHA
Jinsiyadda Edeysanayaasha





QEYBTA 4^{aad}: HORUMARRADA HAY'ADAHA GARSOORKA 2025

Warbixintan Waxqabadka Garsoorka Dalka ee sannadka 2025 waxa ay si guud u soo bandhigaysaa dadaalladii, horumarradii iyo isbeddelladii la taaban karay ee laga sameeyay hay'adaha Garsoorka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya muddada sannadkaas. Warbixintu waxa ay ka tarjumaysaa jihada istiraatiijiga ah ee Garsoorka Dalka, iyadoo diiradda la saarayo tayeynta adeegyada caddaaladda, dardargelinta dacwadaha, casriyeynta nidaamyada shaqo iyo xoojinta kalsoonida dadweynaha ee hay'adaha garsoorka.

Sannadka 2025 waxa uu ahaa sanad horumar la taaban karo, kaas oo Garsoorka Dalka uu ka gudbay marxalado dib-u-habeyn una gudbay heer xasillooni iyo waxqabad muuqda leh. Horumarkan waxa saldhig u ahaa dadaalladii istiraatiijiga ahaa ee la bilaabay sannadihii ka horreeyay, gaar ahaan hirgelinta nidaamyo casri ah, kordhinta awoodda shaqo ee hay'adaha garsoorka, iyo horumarinta kaabayaasha iyo kartida hawl-wadeennada garsoorka.

Warbixintan oo ah warbixin qaran oo guud, waxa ay ku wajahan tahay dhammaan daneeyayaasha ay khusayso caddaaladda iyo dowladnimada, oo ay ugu horeyaan dadka ku nool gayiga Soomaaliya oo loo adeegyo. Ujeeddadu waa in si daahfuran loo muujiyo waxqabadka Garsoorka Dalka, loo na cabbiro heerka horumarka la gaaray, isla markaana loo abuuro saldhig xog-ogaal ah oo lagu qiimeeyo jihada mustaqbalka ee nidaamka caddaaladda.

Iyadoo la tixgelinayo doorka Garsoorku ku leeyahay dhismaha dowladnimo waarta, ilaalinta xuquuqda muwaadiniinta iyo xasillinta bulshada, warbixintani waxa ay caddeyneysaa sida Garsoorka Dalka uu sannadka 2025 ugu guuleystay in uu horumar ka sameeyo hawlaha aasaasiga ah ee caddaaladda, una tallaabo qaado dhisidda nidaam garsoor oo hufan, daahfuran, madax-bannaan, isla markaana la jaanqaadaya baahiyaha iyo rajada bulshada Soomaaliyeed.

4.0. Himilooyinka Istiraatiijiga ah ee Garsoorka

Sannadkii 2022, Maamulka Sare ee Garsoorka Dalka, isaga oo kaashanaya daneeyayaasha arrimaha caddaaladda iyo garsoorka, waxa uu dejiyay himilooyin istiraatiiji ah oo loogu talagalay inay saldhig u noqdaan jihada uu aadayo Garsoorka Dalka shanta sano ee soo socota. Himilooyinkan waxa ay aasaas u noqdeen qorsheynta, fulinta iyo qiimeynta waxqabadka hay'adaha garsoorka, si loo helo nidaam garsoor oo hufan, daahfuran, madax-bannaan, islamarkaana



awood u leh inuu si buuxda uga jawaabo baahiyaha caddaaladeed ee bulshada Soomaaliyeed.

Sannadka 2025, waxa uu ahaa sannad guulo la taaban karo laga gaaray himilooyinkan marka loo eego hawlihii la qabtay iyo waxyaabihii qabsoomay. gaar ahaan dardargelinta dacwadaha, casriyeynta nidaamyada garsoorka, horumarinta kartida hawl-wadeennada, iyo xoojinta kalsoonida dadweynaha. Himilooyinkaasi waxaa kamid ahaa:

a) Xoojinta Helitaanka Caddaaladda iyo Dardargelinta Dacwadaha

In la xaqiijiyo in muwaadiniinta Soomaaliyeed iyo dadka ku nool gayiga Soomaaliya ay helaan adeegyo caddaaladeed oo hufan la iskuna halleyn karo, iyadoo la dardargelinayo dacwadaha, la kordhinayo awoodda maxkamadaha, lana yareynayo dib-udhacyada.

b) Casriyeynta iyo Dhijitaaleynta Nidaamyada iyo Habraacyada Garsoorka

In la horumariyo lana abuurto nidaamyada casri ah oo elektaroonig ah, oo ay ugu muhiimsan yihiin Nidaamyada Lagu Maareeyo Dacwadaha, Lagu keydiyo Xogta Islamarkaana lagu Maamulo Maxkamadaha; Sidoo kale in la helo isku xirnaan u dhaxeysa nidaamyada garsoorka iyo nidaamyada hay'adaha kale ee wada shaqeynta la leh.

c) Dhisidda Awoodda iyo Tayeynta Hawl-wadeennada Garsoorka

In la xoojiyo kartida, aqoonta iyo xirfadda hawl-wadeennada garsoorka, iyada oo loo marayo shaqaaleysiin hufan, tababaro gudaha iyo dibadda ah, iyo abuuridda jawi shaqo oo ku habboon gudashada waajibaadka iyo u adeegidda bulshada.

d) Xoojinta Daahfurnaanta, Isla-xisaabtanka iyo Kalsoonida Dadweynaha

In la adkeeyo kalsoonida bulshada ee nidaamka garsoorka, iyadoo la hubinayo saxnaanta xogta dacwadaha, daahfurnaanta maaliyadeed, iyo hirgelinta hababka isla-xisaabtanka.



e) Ballaarinta Kaabayaasha iyo Taageeridda Horumarka Waara ee Garsoorka

In la horumariyo kaabayaasha garsoorka, qalabeynta xafiisyada iyo maalgelinta jiilka mustaqbalka ee sharciga, si loo dhiso nidaam garsoor oo waara, casri ah una diyaarsan baahiyaha hadda iyo kuwa mustaqbalka.

4.1. Dulmar Guud: Waxqabadka Garsoorka 2025

2025 waxa uu ahaa sannad uu Garsoorka Dalka xaqiijiyay horumar la taaban karo iyo guulo waxku'ool ah, iyada oo la hirgeliyay hawlo badan oo taabanaya tiirarka aasaasiga ah ee caddaaladda. Intii lagu guda jiray 2025, Garsoorka Dalka waxa uu horumar muuqda ka sameeyay dhanka dardargelinta iyo dadajinta dacwadaha, taas oo keentay in tirada dacwadaha la maareeyay iyo kuwa ladhammeeyay ay si weyn uga bataan sannadihii hore.



Arrintan waxaa gacan weyn ka geystay kordhinta awoodda shaqo ee maxkamadaha, iyada oo la hawlgeliyay garsoorayaal, kaaliyayaal iyo xeer-ilaaliyayaal cusub, si dhameystirana loo qalabeeyay xafiisyadii ay ku shaqeyn lahaayeen.

Sidoo kale, sannadkan waxaa xoogga la saaray casriyeynta nidaamyada garsoorka, iyadoo la isku xiray nidaamka Garsoorka iyo **Nidaamka Aqoonsiga Qaranka (NIRA)** si loo hubiyo saxnaanta xogta muwaadiniinta loogana hortago dacwadaha been-abuurka ku dhisan. Sidoo kale waxaa la isku xiray nidaamka Garsoorka iyo Nidaamka Dakhliga ee Wasaaradda Maaliyadda si loo xaqiijiyo daahfurnaanta, isla-xisaabtanka iyo in dakhliga ka soo xarooda adeegyada garsoorka uu si toos ah ugu dhaco Khasnadda Dowladda.

Intaa waxaa dheer, waxa heer gabagabo ah la gaarsiiyay horumarinta Nidaamka Mideysan ee Maareynta Dacwadaha (IECMS), kaas oo la filayo in uu noqdo tiir-dhexaadka isku-xira hay'adaha caddaaladda laga soo bilaabo booliiska ilaa xabsiyada.



Dhanka kale, Garsoorka Dalka waxa uu si weyn diiradda u saaray dhisidda kartida hawl-wadeennada, iyada oo la fuliyay tababaro gudaha iyo dibadda ah oo diiradda lagu saaray shuruucda garsoorka, maamulka maxkamadaha, la dagaallanka dambiyada culus iyo tayeynta go'aannada garsoorka. Sidoo kale, waxaa la xoojiyay tababaridda iyo fursad siinta jilka mustaqbalka oo ah ardeyda barata sharciga, iyadoo ardayda jaamacadaha dalka la siiyay fursado internship iyo aqoon-kororsi, taas oo ay si weyn uga faa'ideysteen.



Ugu dambeyn, waxqabadyada Garsoorka Dalka ee sannadka 2025 waxa ay ka turjumayaan isku-xirnaanta, qorsheynta istiraatiijiga ah iyo fulinta waxku'oolka ee ay iskula shaqeynayaan maamulka iyo hawl-wadeennada Garsoorka, taas oo laanta Garsoorka ka dhigtay hay'ad si muuqata uga gudubtay marxaladdii dib-u-habeynta una tallaabsatay marxalad horumarin.

Dulmarkani waxa uu muujinayaa in Garsoorka Dalka uu si kalsooni leh ugu socdo jihada dhisidda nidaam caddaaladeed waara, casri ah, daahfuran, isla markaana si buuxda uga jawaaba rajada iyo baahiyaha bulshada Soomaaliyeed. Qeybaha soo socda waxaan ku faafaahin doonnaa waxqabadyada ugu muhiimsan ee Garsoorka Dalka 2025.

4.1.1. Dhagax-dhigidda Dhismo Cusub oo uu yeelanayo Garsoorka Dalka

Iyadoo laga duulayo istiraatiijiyadda ballaarinta kaabayaasha Garsoorka Dalka iyo xoojinta awoodda hay'adaha garsoorka ee bixinta adeeg caddaaladeed oo hufan, sannadka 2025 waxa si rasmi ah loo dhagax dhigay dhismo cusub oo ay yeelanayaan hay'adaha Garsoorka, kaas oo ka kooban saddex (3) dabaq.



Munaasabadda dhagax-dhigidda waxa ka soo qayb galay, isla markaana si rasmi ah u dhagax dhigeen Guddoomiyaha



Maxkamadda Sare ee dalka iyo Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda Federaalka Soomaaliya, taas oo muujinaysa muhiimadda maamulka sare ee Garsoorka ay siinayaan horumarinta Garsoorka Dalka.

Dhismahan cusub waxa uu si gaar ah uga jawaabayaa baahida sii kordheysa ee loo qabo kordhinta hawl-wadeennada hay'adaha garsoorka, xilli sannadihii u dambeeyay si muuqata ay u kordhayeen tirada hawl-wadeennada garsoorka iyo baaxadda adeegyada ay bixiyaan maxkamaduhu. Dhismaha ayaa la qorsheeyay in uu noqdo xarun casri ah oo loogu talagalay in hawl-wadeennada garsoorka iyo dadka u soo adeeg doonanaya hay'adaha Garsoorka ay ku helaan jawi shaqo oo nidaamsan, ammaan ah, isla markaana la jaanqaadaya heerarka casriga ah ee maamulka garsoorka.

Hirgelinta mashruucan dhisme waxa uu wax weyn ka tari doonaa baahinta adeegyada garsoorka iyo fududeynta shaqada, waxa uuna hoos u dhigi doonaa ciriiriga ka jira xarumaha garsoorka dalka, isla markaana waxa uu door muuqda ka qaadan doonaa bilicda deegaanka shaqo ee hay'adaha garsoorka oo heli doona xarun dhisme oo casri ah kuna habboon adeeg-bixinta.



Guud ahaan, mashruucan oo hadda ku dhow gabagabo waxa ay astaan u yahay in horumar la taaban karo lagu sameeyay kaabayaasha Garsoorka dalka sannadka 2025, taas oo ka turjumaysa jihada istiraatiijiyadeed ee dowladda iyo Maamulka Sare ee Garsoorka ee ku wajahan dhisidda nidaam garsoor oo awood leh, ballaaran, isla markaana u diyaarsan in uu ka jawaabo baahiyaha hadda iyo kuwa mustaqbalka ee bulshada Soomaaliyeed.



4.1.2. Hawlgelinta Garsoorayaal, Kaaliyayaal iyo Xeer-ilaaliyayaal Cusub

Iyadoo laga jawaabayo baahida sii kordheysa ee adeegyada garsoorka iyo ujeeddada ballaarinta helitaanka caddaaladda ee muwaadiniinta Soomaaliyeed, sannadka 2025 waxaa si rasmi ah loo hawlgeliyay hawl-wadeenno cusub oo isugu jira 30 garsoore, 40 kaaliye maxkamadeed iyo 20 xeer-ilaaliye, kuwaas oo lagu daray hay'adaha Garsoorka Dalka heerarkiisa kala duwan. Hawlgelintan ayaa qeyb ka ah dadaallada istiraatiijiyadeed ee lagu xoojinayo awoodda shaqo ee garsoorka si uu si hufan uga jawaabo culayska dacwadaha iyo baahiyaha caddaaladeed ee bulshada.



Hannaanka shaqaaleysiinta hawl-wadeennadan oo soo billowday dabayaaqadi sannadka 2023, waxa uu ku saleysnaa imtixaan furan oo lagu soo baxayay kartida, aqoonta iyo anshaxa codsabayaasha. Tani waxay mujineysaa sida Maamulka Sare ee Garsoorka Dalka uga go'an tahay dhismaha hay'ad garsoor oo ku dhisan caddaalad, isla-xisaabtan iyo kalsooni bulsho.

Bilowgii sannadka 2025 ayay hawl-wadeennadan cusub si buuxda u soo hawlgeleen, kadib markii la xaqiijiyay miisaaniyaddooda dhanka mushaaraadka iyo xuquuqaha, lana diyaariyay xafiisyadii iyo agabkii shaqo ee ay ku hawl-geli lahaayeen. Sidoo kale, hawl-wadeennadan ayaa hore waqtiyo kala duwan loogu qabtay **tababaro xirfadeed** oo diiradda lagu saaray shuruucda garsoorka, habraacyada maamulka dacwadaha iyo nidaamka shaqo ee hay'adaha garsoorka, si loo xaqiijiyo in ay si degdeg ah ula qabsadaan gudashada waajibaadkooda shaqo.

Hawlgelinta, howl-wadeennadaan cusub waxa ay door muuqda ka qaadatay dardargelinta dacwadaha, yaraynta dib-u-dhaca kiisaska iyo ballaarinta helitaanka caddaaladda ee dadweynaha Soomaaliyeed. Kororka tirada hawl-wadeennada garsoorka waxa uu suurto-geliyay in maxkamaduhu ay si hufan u maareeyaan dacwadaha soo kordhay, ayna sare u qaadaan tayada adeegga ay u fidinayaan bulshada.



Gebagebadii, hawlgelinta hawl-wadeennadan cusub waxa ay ka tarjumaysaa isbeddel istiraatiiji ah oo lagu xoojinayo Garsoorka Dalka, iyada oo loo gogol-xaarayo nidaam garsoor oo awood leh, heystana shaqaale tayo leh, isla markaana u diyaarsan in uu xaqiijiyo caddaalad loo siman yahay, degdeg ah, loona heli karo dhammaan muwaadiniinta Soomaaliyeed.

4.1.3. Ku Xiridda Nidaamka Aqoonsiga Qaranka (NIRA) ee Hay'adaha Garsoorka

Iyadoo laga duulayo in la adkeeyo hufnaanta garsoorka, la hubiyo saxnaanta xogta muwaadiniinta, isla markaana laga hortago qaladaad ka dhaca nidaamka maxkamadaha, sannadka 2025 waxaa si rasmi ah nidaamka Hay'adda Aqoonsiga Qaranka (NIRA) loogu xiray hay'adaha Garsoorka Dalka. Tallaabadan istiraatiijiga ah ayaa loogu gol lahaa in xogta dadka u soo adeeg doonanayo maxkamadaha la hubiyo saxnaashaheeda, isla markaana laga hotago dacwadaha ku dhisan dhagarta iyo wax is daba marinta.



Hirgelinta nidaamkan awgeed, waxaa hay'adda NIRA ay xafiiska ka furtay xarunta ay ku shaqeeyaan garsoorka, waxaana qasab laga dhigay in qof kasta oo dacwad ka furanaya maxkamad, inuu heysto aqoonsi rasmi ah. Arrintan ayaa meesha ka saartay caqabado la xariiray aqoonsi qofka oo muddo dheer taagnaay, gaar ahaan kiisaskii ay dadku ku furan jireen magacyo kala duwan ama xog aan sax ahayn, taas oo keeni jirtay jahwareer sharci, dib-u-dhac dacwadeed iyo ku-takrifal nidaamka caddaaladda.

Ku xiridda nidaamka NIRA ee Garsoorka waxa uu si toos ah uga hortagay dacwadaha dhagarta ah iyo isticmaalka aqoonsiyo been abuur ah, waxa uuna suurtageliyay in xogta qofka dacwadda furanaya ama adeegga sharci u imaanaya maxkamadaha si degdeg ah loo hubiyo. Tani waxa ay saameyn wanaagsan ku yeelatay hufnaanta iyo sax ahaanshaha dukumintiyada maxkamadaha, go'aannada garsoorka iyo guud ahaan hannaanka maareynta dacwadaha, maadaama ay ku saleysan yihiin xog rasmi ah oo la xaqiijiyay.

Sidoo kale, tallaabadan waxa ay door muuqata ka ciyaartay kordhinta qaadashada aqoonsiga rasmiga ah ee dadweynaha, maadaama muwaadiniinta u adeeg doonaya maxkamadaha lagu dhiirigeliyay,



isla markaana lagu waajibiyay in ay qaataan Aqoonsiga Qaranka. Arrintan ayaa gacan ka geysaneysa ballaarinta diiwaangelinta muwaadiniinta iyo tayeynta keydka xogta qaranka, taas oo faa'iido u leh hay'adaha kala duwan ee dowladda.

Guud ahaan, ku xiridda nidaamka NIRA ee system-yada Garsoorka waxa ay astaan u tahay isbeddel qotodheer, kaas oo si weyn u xoojiyay hufnaanta garsoorka, yareeyay ku cayaaridda xogta, isla markaana sare u qaaday kalsoonida dadweynaha ee xogta iyo adeegyada ay bixiyaan hay'adaha Garsoorka Dalka.

4.1.4. Isku Xiridda Nidaamka Dakhliga Wasaaradda Maaliyadda iyo Garsoorka

Iyadoo mudnaan la siinayo fududeynta adeegyada loo fidiyo muwaadiniinta, kor u qaadista daahfurnaanta maaliyadeed iyo xoojinta isla-xisaabtanka hay'adaha dowladda, sannadka 2025 waxa si rasmi ah la isugu xiray Nidaamka Garsoorka iyo Nidaamka Dakhliga ee Wasaaradda Maaliyadda.



Tallaabadan waxa ay ku timid wada-shaqeyn dhow oo u dhexeysa hay'adaha Garsoorka Dalka iyo Wasaaradda Maaliyadda, iyadoo ujeeddadu ahayd hirgelinta hannaan maaliyadeed oo casri ah, hufan isla markaana la isku halleyn karo.

Isku xiridda labadan nidaam waxa uu suurta geliyay in dhammaan dakhliga ka soo xarooda adeegyada garsoorka – sida khidmadaha, ganaaxyada sharciyeed iyo lacagaha kale ee la xiriira dacwadaha – si toos ah loogu shubo Khasnadda Mideysan ee Dowladda, iyada oo aan la marin gacan kale, taas oo kor u qaaday hufnaanta iyo daahfurnaanta maaliyadeed ee adeegyada garsoorka islamarkaana meesha ka saartay dib u dhaca hababka lacag bixinta.

Hanaankan cusub waxa uu kaalin mug leh ka qaatay tayeynta maamulka dakhliga dowladda iyo kor u qaadista kalsoonida dadweynaha ee hannaanka ururinta dakhliga. Sidoo kale, waxa uu fududeeyay hababka shaqada ee hawl-wadeennada garsoorka iyo kuwa maaliyadda, isaga oo yareeyay waqtigii iyo kharashkii ku bixi jiray maaraynta lacagaha, suurtageliyayna in hawlaha la xiriira khidmadaha iyo ganaaxyada loo maareeyo si degdeg ah oo hufan.



Guud ahaan, isku xiridda Nidaamka Dakhliga ee Wasaaradda Maaliyadda iyo Nidaamka Garsoorka ee sannadka 2025 waxa ay ka tarjumaysaa isbeddel istiraatiiji ah oo ku wajahan casriyeynta maamulka maaliyadeed ee Garsoorka, iyadoo ay laf-dhabar u tahay daahfurnaanka, isla-xisaabtan iyo adeeg-bixin ku dhisan kalsoonida dadweynaha iyo danta guud ee qaranka.

4.1.5. Dardargelinta iyo Dadajinta Dacwadaha Maxkamadaha

Shaqada ugu weyn ee ay qabtaan hay'adaha garsoorka, gaar ahaan maxkamaduhu, waa kala saaridda khilaafaadka iyo xallinta dacwadaha. Haddaba iyada oo ujeedkaasi laga duulayo, 2025 waxa uu ahaa sannadkii ugu waxqabadka badnaa dhanka dardargelinta iyo dadajinta dacwadaha, maadaama koror aad u ballaaran uu ku yimid tirada **kiisaska la furay** iyo kuwa la **dhammeeyay** marka loo eego sannadihii hore, taas oo ka dhalatay hirgelinta dib-u-habeyntii garsoorka iyo nidaamyadii casriga ahaa ee la aas-aasay.



Marka loo eego sannadka 2024 oo ahaa sanad isbeddel istiraatiiji ah lagu sameeyay hababka maareynta dacwadaha, islamarkaana Maamulka Sare ee Garsoorka uu ku guuleystay in uu seeska u dhigo hannaan shaqo oo ku dhisan isla-xisaabtan, Sannadka la soo dhaafay ee 2025 waxaa la xaqiijiyay koror la taaban karo oo ku yimid tirada dacwadaha la furay iyo kuwa la xalliyay, iyadoo sidoo kale si wax-ku-ool ah loo maareeyay dacwado cusub oo la xiriira dambiyada maaliyadeed sida canshuur la-baxsiga, lacag-dhaqista iyo maalgelinta argagixisada.

Sannadka 2025, Maxkamadda Sare ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waxa ay maareysay guud ahaan 255 gal-dacwadeed, kuwaas oo 126 kamid ah la dhammeeyay, halka 128 ay wali socdeen. Sidoo kale, marka la isku daro heerarka kala duwan ee Maxkamadaha Gobolka Banaadir waxa ay qabteen 3,802 gal-dacwadeed, waxaana la dhammeeyay **4,206** gal-dacwadeed, inkastoo ay ku jireen dacwado ka soo wareegay sannadkii 2024. Dhanka kale, sannadka 2025 waxaa la bixiyay **23,650** oo adeeg mucaamalaad ah.




Guud ahaan, dardargelinta iyo dadajinta dacwadaha maxkamadaha intii u dhexeysay 2023 ilaa 2025 waxa ay ka tarjumaysaa isbeddel nidaamsan oo ku yimid hannaanka garsoorka dalka, iyadoo sannadba sannadka ka dambeeyay la xaqiijinayay guulo waaweyn, kuwaas oo xoojiyay kalsoonida dadweynaha ee nidaamka garsoorka isla markaana saldhig u noqday horumar waara oo ku wajahan caddaalad aan daahin, hufan oo daahfuran.

4.1.6. Horumarinta Nidaamka Mideysan ee Maareynta Dacwadaha

(Integrated Electronic Case Management System – IECMS)

Iyadoo la hiigsanayo casriyeynta nidaamka garsoorka, xoojinta wada-shaqeynta hay'adaha caddaaladda, iyo dardargelinta habraacyada dacwadaha, sannadka 2025 waxa la qaaday tallaabo istiraatiiji ah oo lagu horumarinayo Nidaamka Mideysan ee Maareynta Dacwadaha (IECMS). System-kan cusub ayaa ah hannaan dhijitaal ah oo isku xiraya dhammaan bahda caddaaladda, laga soo billaabo hay'adaha baarista dambiyada ilaa fulinta xukunka.



Nidaamka IECMS waxa uu mideynayaa shaqada iyo xogta hay'adaha Booliiska (CID), Xafiiska Xeer-ilaaliyaha Guud, Maxkamadaha iyo Xabsiyada/Asluubta, si loo helo silsilad dacwadeed oo isku xiran, hufan isla markaana casri ah. Tallaabadani waxa ay meesha ka saari doontaa kala firirsanaanta xogta hay'adaha caddaaladda iyo is-waafaqid la'aanta habraacyada ee horay uga jiri jirtay hannaanka dacwadaha, gaar ahaan dacwadaha ciqaabta.

Nidaamkan cusub waxa uu si buuxda u beddeli doonaa hababkii hore ee gacanta ku shaqeynta ahaa (manual), isaga oo suurtagelinaya in dhammaan xogta dacwadaha lagu maareeyo hab elektaroonig ah. Gal-dacwadeed kasta waxa uu yeelan doonaa xog isku xiran oo laga bilaabo marxaladda baarista Booliiska, Xeer-ilaalinta, Maxkamadaha kala duwan, illaa fulinta xukunka ciqaabta oo u dhammaanaya Xabsiyada. Arrintan waxa ay sare u qaadi doontaa saxnaanta xogta, dabagalka dacwadaha iyo isla-xisaabtanka hay'adaha caddaaladda.

Intii lagu guda jiray sannadka 2025, waxa si weyn looga shaqeeyay naqshadeynta, horumarinta farsamada, isku-dubaridka hay'adaha iyo tijaabinta nidaamka, iyadoo IECMS uu haatan marayo heer gabagabo



ah. Marxaladdan waxa ay muujinaysaa diyaargarow buuxa oo ku wajahan in systemka la hirgeliyo horraanta sannadkan 2026.

Guud ahaan, horumarinta Nidaamka Mideysan ee Maareynta Dacwadaha sannadka 2025 waxa ay ka tarjumaysaa jihada istiraatiijiga ah ee Garsoorka Dalka ee ku wajahan dhisidda nidaam caddaaladeed casri ah, dhijitaal ah, isla markaana si buuxda u taageeraya wada-shaqeynta hay'adaha kala duwan iyo danta guud ee muwaadiniinta Soomaaliyeed.

4.1.7. Tababarka iyo Kor U Qaadista Kartida Hawl-wadeennada Garsoorka

Maadaama tayada iyo awoodda garsoorku ay si toos ah ugu xiran yihiin aqoonta, xirfadda iyo kartida hawl-wadeennada ka shaqeeya, sannadka 2025 waxaa mudnaan gaar ah la siiyay dhisidda kartida iyo tababarka hawl-wadeennada Garsoorka Dalka, heerarkooda kala duwan. Tababaradan ayaa isugu jiray kuwo dibadda lagu soo qaatay iyo kuwo gudaha dalka lagu qabtay, kuwaas oo loogu talagalay kor u qaadista aqoonta sharci, xirfadaha maamul iyo la tacaalidda dambiyada casriga ah.

Sannadka 2025, hawl-wadeennada Garsoorka Dalka waxa ay ka qeyb galeen tababarro caalami ah oo lagu qabtay dalal kala duwan, kuwaas oo diiradda lagu saarayay arrimo istiraatiiji ah oo la xiriira horumarinta nidaamka garsoorka iyo la dagaallanka dambiyada culus. Tababaradaas waxaa kamid ahaa:

- a) Tababar lagu qabtay magaalada Nairobi, oo ay ka qeyb galeen garsoorayaal ka kala socday heerar kala duwan, kuna saabsanaa dembiyada maaliyadda iyo la dagaallanka musuqa, si loo xoojiyo awoodda garsoorka ee maaraynta kiisaska maaliyadeed.
- b) Tababar lagu qabtay dalka Masar, oo ay ka qeyb galeen madaxda ugu sarreysa hay'adaha garsoorka iyo garsoorayaal heerar kala duwan ah, kaas oo xoogga lagu saaray maamulka maxkamadaha, hoggaaminta hay'adaha garsoorka iyo tayeynta hannaanka maamulka caddaaladda.
- c) Tababar lagu qabtay dalka Turkiga, oo ay ka faa'iidaysteen garsoorayaal kala duwan, jeedkiisuna ahaa la dagaallanka argagaxisada, fahamka shuruucda caalamiga ah iyo habraacyada maxkamadaynta dambiyada la xiriira amniga.
- d) Tababar lagu qabtay Boqortooyada Sucuudiga, oo ay ka qeyb galeen garsoorayaal heerar kala duwan, kaas oo diiradda lagu saaray is-weydaarsiga khibradaha garsoorka, habraacyada



shareecada Islaamka iyo doorka garsoorka ee ilaalinta caddaaladda iyo xasilloonida bulshada.

4.1.8. Machadka Tababarka Garsoorka

sannadka 2025 waxa si ballaaran loo qabtay tababarro gudaha ah, iyadoo lala kaashanayo Machadka Tababarka Garsoorka Soomaaliya. Tababaradan ayaa loogu talagalay hawl-wadeennada kala duwan ee Garsoorka, oo isugu jira kaaliyayaasha, garsoorayaasha iyo shaqaalaha farsamada, waxaana diiradda lagu saaray mowduucyo muhiim u ah shaqada maalinlaha ah ee maxkamadaha, waxaana kamid ahaa tababaradaas:



- La dagaallanka ka ganacsiga dadka iyo tahriibinta.
- Tababar ku saabsan hab-maamulka maxkamadaha degmooyinka.
- Qaab-qoraalka xukunka iyo takyiifinta dhacdada.
- Sababeynta xukunka iyo nidaaminta go'aanka xukunka.
- Tababar ku saabsan Xeerka Qoyska.
- Tababar ku saabsan Xeerka Habka Ciqaabta.
- Tababar ku saabsan Xeerka Habka Madaniga.
- Tababar ku saabsan arrimaha dhaxalka.

4.1.9. Madasha Garsoorayaasha Dalka

Dhanka kale, intii lagu jiray 2025, waxa si guul leh u qabsoomay Madasha 6aad iyo Madasha 7aad ee Garsoorayaasha Dalka, taas oo ah madal ay garsoorayaashu ku wadaagaan khibradahooda shaqada, iskuna dhaafsadaan aragtiyadooda qaanuunka. Madalahaasi waxa diiradda lagu saaray mowduucyo ay ka mid yihiin hababka xaqiijinta dukumintiyada dhulka, dacwadaha dhulka danta guud, fulinta xukunnada (ciqaabta iyo madaniga), caqabadaha ka jira fulinta xukunnada, habraaca dacwadaha gaaban, kharashaadka dacwadaha, habraacyada beeninta dukumintiyada, iyo hababka gaarsiinta dukumintiyada iyo xukunnada.

Marka la isku soo duubo, tababaradan gudaha ah iyo dibadda ah iyo madaladan aqooneed waxa ay si weyn u xoojiyeen fahamka



sharciyeed ee hawl-wadeennada garsoorka, xirfadaha garsooridda iyo tayada go'aannada maxkamadaha, sidoo kalena waxa ay fursad u siisay hawl-wadeennada Garsoorka in ay ka faa'iidaystaan khibradaha caalamiga ah.

Guud ahaan, tababarka hawl-wadeennada Garsoorka sannadka 2025 waxa uu ka tarjumayaa jihada istiraatiijiga ah ee Garsoorka Dalka ee ku wajahan dhisidda hay'ad garsoor oo aqoon, xirfad iyo anshax ku dhisan, isla markaana awood u leh in ay si hufan uga jawaabto baahiyaha caddaaladeed ee bulshada Soomaaliyeed iyo caqabadaha sharci ee isbeddelaya.



4.1.10. Barnaamijyada Internship-ka iyo Aqoon-kororsiga Ardayda Barata Sharciga

Iyadoo laga duulayo muhiimadda ay leedahay kobcinta jilka mustaqbalka ee garsoorka iyo bahda sharciga, lana xoojinayo wada-shaqeynta iyo iskaashiga u dhexeeya bahda tacliinta sare iyo hay'adaha garsoorka, sannadka 2025 waxaa la fuliyay barnaamijyo internship iyo aqoon-kororsi ah (workshops) oo loogu talagalay ardayda barata Kulliyadaha Shareecada iyo Qaanuunka ee jaamacadaha dalka.



Sannadka 2025, tirada guud ee ardayda ka faa'iideysatay barnaamijyada internship-ga ee maxkamadaha kala duwan – oo ay ku jiraan Maxkamadda Gobolka Banaadir, Maxkamadda Racfaanka Gobolka Banaadir iyo Maxkamadda Sare ee Dalka – waxa ay gaartay 112 arday. Ardaydan waxa la siiyay fursad ay si toos ah ugu tababartaan xarumaha garsoorka, muddada tababarkooduna waxa ay u



dhaxaysay 3 ilaa 6 bilood, taas oo u suurto-gelisay in ay helaan waayo-aragnimo shaqo oo dhameystiran.

Intii ay ku jireen muddada tababarka, ardaydu waxa ay si dhow ula shaqeeyeen xafiisyada garsoorayaasha iyo kaaliyayaasha maxkamadaha, iyaga oo ka qayb qaatay hawlo la xiriira diiwaangelinta dacwadaha, diyaarinta dukumintiyada maxkamadaha, iyo la socodka habraacyada dacwadaha.

Dhanka kale, Maxkamadda Sare ee Dalka ayaa sannadka 2025 qabatay kulan aqoon-kororsi ah oo loogu talagalay ardayda kuliyadaha Shareecada iyo Qaanuunka ee jaamacadaha dalka. Kulankan oo ay fududeenayen garsoorayaal ka kala socday Maxkamadda Sare iyo Maxkamadda Racfaanka Gobolka Banaadir, ayaa ardeydu waxa ay ku heleen fahamka nidaamka garsoorka, qaab-dhismeedka iyo heerarka maxkamadaha, iyo doorka ay hay'adaha caddaaladdu ku leeyihiin ilaalinta sharciga iyo xuquuqda muwaadiniinta.

Guud ahaan, barnaamijyada internship-ka iyo aqoon-kororsiga ee ardayda sannadka 2025 waxa ay door muhiim ah ka ciyaareen dhisidda kartida mustaqbalka ee garsoorka, xoojinta xiriirka u dhexeeya hay'adaha caddaaladda iyo bahda tacliinta sare, iyo abuuridda arday faham buuxa u leh nidaamka garsoorka dalka, taas oo saldhig u noqon doonta horumar waara oo ku yimaada Garsoorka Soomaaliyeed mustaqbalka.

4.2. Caqabadaha La Wajahay

Hawl kasta oo la qabtaa marnaba kama marnaato caqabado. Haddaba intii lagu guda jiray 2025, waxaa jiray caqabado kala duwan oo saameyn ku yeeshay habsami u socodka hawlaha garsoorka, kuwaas oo intooda badan la xiriiray xaaladda guud ee dowlad-dhiska dalka iyo baahida adeegyada caddaaladda. Sidaas oo ay tahay, haddana Garsoorka Dalka waxa uu muujiyay adkaysi, qorsheyn iyo maarayn suurtagelisay in la gaaro natiijooyin waxku'ool ah.

Dhanka maaliyadda, waxa jiray caqabado la xiriiray miisaaniyadda oo xaddidan iyo dib-u-dhac ku yimid helitaanka qarashaadka, taas oo saameyn ku yeelatay hirgelinta qaar kamid ah hawlihii qorshaysnaa, gaar ahaan dhanka dhismaha kaabayaasha iyo ballaarinta adeegyada. Si kastaba ha ahaatee, Maamulka Sare ee Garsoorka Dalka waxa uu mudnaanta ugu sarreysay siiyay inuu beeqaamiyo inta



la heli karay miisaaniyadda, isaga oo diiradda saaray hawlaha saameynta tooska ah ku leh helitaanka caddaaladda.

Dhanka awoodda shaqaalaha, waxa jiray isu dhignaan la'aan u dhexeysa culeyska shaqada iyo tirada hawl-wadeennada garsoorka, gaar ahaan bilowgii sannadka 2025 iyo sannadihii ka horreeyay. Tirada dacwadaha oo sii kordhaysay ayaa caqabad ku noqoneysay awoodda hawl-wadeennada maxkamadaha, taas oo keentay culays shaqo oo dheeraad ah. Hawlgelinta hawl-wadeennada cusub waxa ay waxweyn ka tartay yareynta culeyskaasi baaxadda lahaa.

Dhanka kaabayaasha garsoorka, waxa jiray xaddidaad dhanka qalabka iyo goobaha ama xafiisyada lagu shaqeynayo, taas oo saameysay qaar kamid ah xafiisyada maxkamadaha. Sidoo kale, xarumo garsoor oo hore u jiray ayaa u baahnaa dayactir iyo casriyeyn si ay ula jaanqaadaan baahida sii kordheysa ee adeegyada. Caqabaddan oo wali taagan waxa ay ku dhiirigelisay Maamulka Sare ee Garsoorka Dalka in la dardargeliyo dhismaha cusub ee loo dhisayo garsoorka dalka iyo in diiradda la saaro helidda agab shaqo oo ku filan.

Dhanka bulshada, inkastoo si weyn wax isaga baddeleen, haddana wali waxa jira in wacyiga dadweynaha ee sharciga iyo hawlaha garsoorka inuu liito, taas oo saameyn ku leh hawlaha Garsoorka iyo dardargelintooda. Arrintani waxaa si joogto ah looga sameeyaa barnaamijyo lagu dhisayo wacyiga dadweynaha ee dhanka sharciga iyo garsoorka.

Guud ahaan, 2025 inkastoo ay jireen caqabado maaliyadeed, farsamo, shaqaale, kaabayaal iyo kuwo bulsho, Garsoorka Dalka waxa uu ku guuleystay in uu si nidaamsan u maareeyo caqabadahaasi ama uu aad u yareeyo, isaga oo u beddelay casharro wax-ku-ool ah oo saldhig u noqon doona qorsheynta iyo hirgelinta waxqabadka sannadaha soo socda.



Qaybta 5^{aad} WAXQABADKA XAFIISKA XEER-ILAALIYAHA GUUD QARANKA 2025

1.0. Howlgalinta Xeer Ilaaliyaasha Cusub ee Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka

Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka waxaa laga hawgeliyey xeer-ilaaliyaal cusub taariikhdu markii ay ahayd 17/02/2025, kadib markii ay dhammeysteen Tababaradii lagama maarmaanka u ahaan howl gudashaqada waajibaadkooda shaqo. Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka ayaa kula dardaarmay Xeer ilaaliyeyaasha in



ay u gutaan waajibaadkooda shaqo si ay ku jirto dhaqan wanaag, karti, daacadnimo, hufnaan iyo ku dhaqanka sharciyada dalka, si loo taabageliyo Dowlad dhiska Dalkeena Soomaaliya.

1.1. Howlgalinta Kaaliyaasha Cusub ee Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka:

Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka ayaa taariikhdu markii ay ahayd 14-04- 2025 waxaa laga hawgeliyey kaaliyaal cusub oo uu xafiisku qaatay, si ay uga midnoqdaan hawl wadeenada xafiiska. Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka ayaa kula dardaarmay kaaliyeyaasha in ay u gutaan



waajibaab kooda shaqo si ay ku jirto dhaqan wanaag, karti, daacadnimo, hufnaan iyo ku dhaqanka sharciyada dalka, si buuxdana looga qayb qaato Dowlad dhiska Dalkeena Soomaaliya.



1.2. Kulanka Xeer Ilaaliyaha Guud iyo Safiirka Maraykanka

Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka Hon. Sulayman Mohamed ayaa kulan la yeeshay Safiirka Mareykanka, Mudane Riley. Kulankan ayaa diiradda lagu saaray sidii loo xoojin lahaa iskaashiga ka dhanka ah la dagaallanka maalgelinta argagaxisada iyo lacag dhaqista, iyo xoojinta dadaallada wadajirka ah ee lagu curyaaminayo dhaqdhaqaaqyada sharci darrada ah ee maalgeliya Ururada Argagaxisada ah ee Al-Shabaab iyo ISIS.



1.3. Wadashaqaybta Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud iyo Hay'adda GIST:

Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka ayaa kulan la qaatay Saraakiil ka socotay Hay'adda GIST oo ka howl gasha Dalka Ingiriiska. Kulanka ayaa ku saabsanaa sidii loo xoojinta lahaa la dagaalanka Maalgelinta Argagaxisa, iyo xog is dhaafsi ku saabsan tabaha ay isticmaalaan argagaxisadu marka ay timaado ilaha dhaqaalaha.



1.4. Baarista iyo Oogista Dacwadda Tahriibka ee Mayoota:

Maadaama ay soo bateen denbiyada tahriibku Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka waxa uu ku guulaystay in la baro kiis Tahriibin ah oo ay ku dhinteen muwaadiniin badan oo soomaaliyeed, waxaa xafiiska u surta gashay in uu tago Jasiiradda Mayoota ee Badwaynta Hindiya, halkaas oo ay ku sugnaayeen dhibanayaal la Tahriibiyay. Kiiskan ayaa waxaa dhibanayaal ka ahaa 75 muwaadin oo 28 kamid ah ay geeryoodeen oo bada ku dhintay ayaga oo la tahriibinayo, waxaana eedaysanayaal ka ahaa 7 Eedaysane.





1.5. Ladagaalanka Maalgalinta Argagaxisada:

Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka ayaa sanadkaan ku guulaystay in uu Maxkamadda Horgeeyo eedaysanayaal ku eedaysan Maalgalin Argagaxiso, kuwaas oo dhammaantood lagu helay eedii xafiisku kusoo eedeeyay laguna xukumay Xabsi, Ganaax iyo in dowladdu kala wareegto hantida ladhaqay ee loogu adeegayay Argagaxisada.



1.6. Ladagaalka Dambiga Canshuur Labaxsiga:

Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka, waxaa sanadkan ku guulaystay in uu Maxkamaddaha horgeeyo dad ganacsata ah oo ku eedaysan in ay la baxsadeen canshuurta dowladda ayna isticmaaleen xeelado ay kaga dhuumanayaa canshuurta, dhammaan eedaysanayaasha lagu eedeeyay dambiga canshuur la baxsiga ayaa maxkamadduhu ku heleen faldambiyeedka lagu eedeeyay, waxaana lagu xukumay Ganaax lacageed.



1.7. Ladagaalanka Daroogada:

- a) Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka isaga oo gudanaya waajibaadkiisa shaqo isla markaana ilaalinaya badqabka maanka bulshada, waxa uu gacanta ku dhigay 48 Jawaan oo Daroogo ah, oo midkiiba ay ku jirto 52 Kartoon iyo 189 Baakadood oo ay ku jiraan Kiniiniyo loo isticmaalo Daroogo. Daroogadaas oo laga soo jediyey Garoonka Diyaaradaha ee Adan Cade, laguna dhex qabtay intii aysan u gaarin bulshada.
- b) Sidoo kale, Xafiiska oo kaashanaya hay'adaha amniga, ayaa gacanta ku dhigay Konteenaro isugu jira Daroogo iyo kiniiniyaal ka reeban isticmaalka iyo kaganacsiga, kuwaas oo si sharcidaro ah lagu soo geliyey wadanka, waxaana laga soo dejiyey Dekada Muqdisho, laguna dhex qabtay intii aysan ka bixin oo aysan u gudbin bulshada.





- c) Xafiiska Xeer Ilaaliyaha guud ee Qaranka, kadib marka uu mariyay habraacyada sharci ayaa ku guulaystay in uu gubo maadooriye khatar weyn ku haya bulshada Soomaaliyeed gaar ahaan dhalinyarada oo noocyadiisu ubadneyd Maandooriyaha loo yaqaan Taabuu, kaas oo sifo sharci daro ah lagu soo galiyay wadanka.



1.8. La-dagaalanka Cuntada Dhacday:

Xafiiska Xeer Ilaaliyaha guud ee Qaranka, kadib marka uu mariyay habraacyada sharci ayaa ku guulaystay in uu fuliyo gubista cunto dhacday oo khatar weyn ku ahayd bulshada Soomaaliyeed taas oo lasoo galiyay wadanka.





1.9. Soo-celinta Eedayanayaasha u baxsada dalka dibadiisa:

Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka, ayaa sanadkaan ku guulaystay in uu dalka ku soo celiyo eedayanayaal ka baxsaday dalka, kadib marka ay galeen faldambiyeedyo, kuwaas oo dambiyo ka kala gaystay Gobolada wadanka.



1.10. Kormeerka Isbitaal Madiina:

Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka

ayaa kormeer ku tagay Isbitaalka Madiina si loogu kuurgalo adeegyada caafimaad ee Isbitaalku u hayo bulshada Soomaaliyeed. Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka ayaa warbixin dhinacyo badan leh, oo ay ugu muhiimsaneyd Habka loo



maareeyo kiisaska Sharciga caafimaad ee la xiriira Garsoorka iyo Caddaaladda dalka ka dhegaystay Agaasimaha Isbitaalka. Kormeerkaan iyo Booqashadan ayaa aheyd mid muhiimad gaara u leh xoojinta wadashaqeynta u dhexeeya garsoorka iyo Hosbitaalka Madina oo ah hay'adaha Caddaaladda ka saacida baarista iyo ka go'aan gaarista dacwadaha, sidoo kalena bulshada u haya adeeg caafimaad.

1.11. Qaybta Kormeerka Xabsiyada iyo Maxaabiista:

Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka gaar ahaan Qaybta kormeerka Xabsiyada iyo Maxaabiista, ayaa ku guulaysatay sanadkaan in ay kormeer ku samayso Qaybaha, Saldhigyada iyo Xabsiyada lagu hayo Maxaabiista.

Kormeeradaas oo daarranaa, talo bixinta sharci, hagista, isla xisaabtan, la socodka xaaladda Maxaabiista, iyo xallinta caqabadaha ka jira Qaybaha, Saldhigyada iyo Xabsiyada Guud, si loo xaqiijiyo Caddaaladda Maxaabiista.





1.12. Kulanka Waaxda la dagaalanka denbiyada Lidka ku ah Ka Ganacsiga Dadka iyo Socdaalka Sharci darrada ah iyo Hoggaanka CID:

Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka gaar ahaan Waaxda La-dagaalanka Denbiyada Lidka ku ah Ka Ganacsiga Dadka iyo Socdaalka Sharci darrada ah ayaa kulan la yeeshay Hoggaanka Hay'adda Denbi baarista denbiyada (CID). kulankaas oo ajandihiisu ahaa dardargelinta ladagaalanka denbiyada Socdaalka Sharci darrada, Tahriibka, iyo sidoo kale sidii Dadka ku fooggan Socdaalka sharci darada loo horkeeni lahaa Hay'adaha Garsoorka Dalka.



1.13. Kormeerka Laanta Dhexe Ilaalada Canshuuraha:

Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka gaar ahaan Xeer Ilaaliyeyaasha Waaxda la dagaalanka Denbiyada Lidka ku ah Maaliyadda, Dhaqaalaha iyo kuwa danabaysan ayaa kormeeray Laanta Dhexe Ilaalada Canshuuraha iyo Dhaqaalaha Booliska Soomaaliyeed,



kormeerkaas oo ay ujeedadiisu ahayd Dar-dargalinta wadashaqaynta Xafiiska Xeerilaaliyaha Guud ee Qaranka iyo Laanta Dhexe ee Ilaalada Cashuuraha, gaar ahaan Baarista iyo Oogidda Dambiyadda ka dhanka ah Canshuuraha, sidii looga hortagi lahaa dadka galaya dembiyada Cashuur-la-Baxsiga.

1.14. Cafiska Maxaabiista:

Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka ayaa sanadka 2025 Cafis Madaxweyne kusii daayay 114 Maxbuus oo ku xirnaa Xabsiga Dhaxe ee Xamar iyo Xabsiga MBCC ee Ex Control Afgooye, Cafiskaas oo ku yimid Munaasabadda Bisha Barakeysan ee Ramadaan awgeed.





1.15. Tayeynta Xirfada Hawlwadeenada Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud

Xafiiku waxa uu ku dadaalay sidii ay hawylawadeena xafiiska ka shaqeeyaa u heli lahayeen, tabbaro kor loogu qaadayo aqoontooda iyo xirfadooda. Sidaa darteed hawlwadeenadu waxaa ay heleen tabbaro kor loogu qaayeyey aqoontooda iyo xirfadooda, kuwaas oo lagu qabtay dalka gudahiisa iyo dibadiisaba, kuwaaso kor u dhaafaya ilaa **35 tababar**.



1.16. Kulanka Wadajirka ah ee Waaxda Dembiyada Lidka ku ah Dawladda iyo Nidaamka Guud & Waaxda Dilalka iyo Dhaawacyada ee Q.B.D. (CID).

Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka gaar ahaan Waaxda Dembiyada Lidka ku ah Dawladda iyo Nidaamka Guud ayaa kulan la yeeshay Waaxda Dilalka iyo Dhaawacyada ee CID. kulankaas oo ajandihiisu ahaa dardargelinta ladagaalanka denbiyada dilalka iyo dhaawacyada, iyo sidii loo hagaajin lahaa baaristooda, loona horgayn lahaa Hay'adaha Garsoorka Dalka.

1.17. Kulanka Madasha Qaran ee Forensiga (kulanka 4aad):

Waaxda Ladagaalanka Tacaddiyada Jinsiga Iyo Denbiyada Carruurta ayaa sanadkii afraad oo xiriir ah ku guulaystay diyaarinta Madasha Qaran ee Forensiga (kulanka 4aad) oo loogu soo bandhigo hormarada baarista forensiga iyo xalinta caqabadaha ka jira.





1.18. Talo Soo Jeedin

Iyadoo laga duulayo waxqabadkii la xaqiijiyay, guulihii la gaaray iyo sidoo kale caqabadihii la wajahay sannadka 2025, warbixintan waxa ay soo jeedineysaa talooyinkan hoos ku xusan si loo sii xoojiyo horumarka Garsoorka Dalka loona hubiyo waxku'ool-nimadiisa:

- 1) Kordhinta iyo joogteynta maaliyadda Garsoorka, si loo daboolo baahiyaha shaqada, qalabeynta xafiisyada, kaabayaasha iyo hirgelinta nidaamyada casriga ah.
- 2) Xoojinta kartida iyo xirfadda shaqaalaha Garsoorka, iyo sii wadida shaqaaleysiinta hawl-wadeenno cusub si la isugu dheellitiro tirade shaqaalaha iyo culayska shaqada.
- 3) Hirgelinta Nidaamka Mideysan ee Maareynta Dacwadaha (IECMS), si loo hubiyo in dhammaan hay'adaha caddaaladda ay isku xirmaan shaqo ahaan iyo xog ahaan.
- 4) Dardargelinta dhismaha iyo dayactirka xarumaha Garsoorka, si loo yareeyo ciriiriga goobaha shaqada loona abuuru jawi ku habboon adeeg-bixinta caddaaladda.
- 5) Kordhinta wacyigelinta sharci ee dadweynaha, si loo kor loogu qaado fahamka bulshada ee nidaamka garsoorka, shuruucda, iyo habraacyada dacwadaha.
- 6) Xoojinta iskaashiga hay'adaha garsoorka, bulshada iyo hay'adaha kale ee Dowladda, si loo hubiyo isku-xirnaan, wada-shaqeyn iyo isla-xisaabtan joogto ah.

Ugu dambeyn, talooyinkan waxa ay adkeynayaan horumarada la gaaray, waxa ayna dowr weyn ka qaadanaayaan in Garsoorka Dalka noqdo hay'ad awood leh, hufan, oo daahfuran, kana jawaaba baahiyaha hadda jira iyo kuwa mustaqbalka ee bulshada Soomaaliyeed.

1.19. GABAGABO

Warbixinta Waxqabadka Garsoorka Dalka ee sannadka 2025 waxa ay muujisay in Garsoorka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya uu gaaray horumar la taaban karo, xasillooni hay'adeed iyo waxqabad la taaban karo. Intii lagu guda jiray 2025, waxa la hirgeliyay hawlo istiraatiiji ah oo kor u qaaday helitaanka caddaaladda, hufnaanta nidaamka garsoorka, casriyeynta nidaamyada iyo xoojinta kalsoonida dadweynaha, kuwaas oo dhammaantood salka ku haya himilooyinkii istiraatiijiga ahaa ee la dejiyay sannadkii 2022.



Inkasta oo ay jireen caqabado dhinaca maaliyadda, hawl-wadeennada oo kooban, kuwa dhanka kaabayaasha iyo fahamka bulshada oo hooseeya, haddana Garsoorka Dalka waxa uu muujiyay adkaysi iyo karti uu si hufan ugu wajahay caqabadahaas. Gebagebadii, sannadka 2025 waxa uu ahaa sanad aas-aas u ah horumar waara, iyadoo dhidibada loo taagay nidaam garsoor oo karti u leh ka jawaabista baahiyaha caddaaladeed ee bulshada.

1.20. GUNAANAD

Ugu dambayn warbixin-sanadeedkan waxay xaqiijisay ujeedkii loogu tala galay warbixin sanadeedka garsoorka dalka oo ah in hal meel laga helo xogta waxqabad ee inta badan Garsoorka Soomaaliya sanadkii hore, si loo ogaado adeegga garsoorku u hayo bulshada. Waxaa la rajayneynaa in xogtan wax badan ka tari doonto sidii looga gudbi lahaa caqabadaha jiray sanadkii tagay, loogana faa'iidaysan lahaa fursadaha taagan iyada oo diiradda la saarayo in bulshadeennu hesho adeeg caddaaladeed oo hufan.

Waxaa halkan loogu mahadcelinaynaa cid kasta oo gacan ka gaysatay shaqooyinkii qabsoomay sannadkii dhammaaday ee 2025, kana shaqaysay soo aruurinta xogta iyo ka shaqeynteeda farsama ahaan. Waxaan rajaynaynaa in sanadka cusub noqdo mid Garsoorka Soomaaliya ugu astaysan horumar iyo adeeg tayo leh Inshaa Allah.

DHAMMAAD



Scan here to access the
conference materials

